

## **Hoggaamiyayaasha Waxbarashada Jamhuuriyada Dominican ayaa Sahmiyo Dugsiyada Cusub ee DCSD**

Wafdi ka socdo Jamhuuriyada Dominican ayaa booqday laba Dugsiyada cusub ee Gobolka DeKalb, Dugsiga Hoose Woodward iyo Dugsiga Hoose Doraville United, si ay u eegaan farbarashadooda iyo shaqooyinka hoggaaminta waxbarashada. Booqashooyinka waxay dhaceen Abriil 30 iyo Maajo 1, oo waxaa abaabulay Wasaarada Waxbarashada ee Jamhuuriyada Dominican oo kaashanaya Jaamacada Mercer. Mercer waxay kala kaashadeen DCSD inay xushaan Dugsiyada Hoose Doraville United iyo Woodward, iyagoo siinaya wafuuda aragtida gacanta koowaad ee shaqooyinka hoggaaminta waxbarashada ee dugsi walba.

“Markii ay wafuuda ay yimaadeen Mercer, waxaan rabnay inay arkaan hoggaaminta waxbarashada iyo saameynta ay ku yeelan karto macalimiinta iyo sidoo kale sida kordhinta guusha ardayda,” Dhaqtar N. Jean Walker ee Jaamacada Mercer ayaa yiri.

“Marka, helida dugsi aan dareenay inaan ku kalsoonnahay waxay noo suurtogelineysaa inaan muujino in haddii aan la shaqeeyo [Maamulaha Kaaliyaha United Doraville] Kimberly Clark sida mid ka mid ah ardaydeyda hogaaminta waxbarashada, inaga ayaa sameynay xiriirkaas. Waaan weydiinay haddii aan booqan karno dugsiga, oo ay na soo dhaweeyaan.”

Ka hor booqashadooda, wafuuda ka socda Jamhuuriyada Dominican waxay kulan Zoom la leeyihiiin hogaamada dugsiga ee Doraville United iyo Woodward si ay u helaan aragtida howlgaladooda. Dhaqtar Walker ayaa sheegay in safarkooda uu siiyay faham la gaareeyay ee waxa laga wada hadlay inta lagu jiray kulamada fogaan aragga.

“Waa hal shey in loo fariisto oo la dhegeysto oo la barto, laakiin xattaa way ka sii saameyn badan tahay markii Aad haysatid fursad aad ku aragtid, ku maqashid, oo aad ku taabatid carruurta. Aad aragtid iyagoo wax baranayo, Aad aragtid xeeladaha waxbarashada ee la hirgeliyey iyo saameynta ay leedahay,” Dhaqtar Walker ayaa yiri. “Si aad u aragtid in carruurta ay tahay natijada ee sida degmada u qorsheyo oo ay ula shaqeeyo hoggaamiyeyaasha dugsiga deegaankooda, sida hoggaamiyeyaashaan dugsiyada deegaanka ula shaqeeyaan macalimiinta, ka dibna saameynta ay ku leedahay carruurta. Waxay aheyd waayo aragnimo waxbarasho cajiib ah.”

Dhaqtar Daniel Garvey wuxuu asal ahaan ka soo jeedaa Cleveland, Ohio, oo wuxuu wax ka baray dhowr sanno Jamhuuriyada Dominican. Wuxuu sharaxay in booqashadooda ay marka ugu horeyo diirada saarto wax ka barashada shaqooyinka hoggaaminta waxbarashada dugsiga. Waxay xiiseynayaan fiirinta nidaamyada dugsiyada iyo borotokoolada lagu kormeero waxbarashada, lagu falanqeeyo xogta qiimeynta ardayda, oo lagu abuuro aaladaha hormarinta xirfada la gaareeyay. Aaladahaas waxaa loogu tallogalay ku taageerida macalimiinta inay hormariyaan shaqadooda.

“Isbuuca wuxuu ahaa cajiib. Wuxaan soo dhaweyn aad u diiran ka helnay Dugsiga hoose Woodward iyo Doraville United,” Dhaqtar Garvey ayaa yiri. “Mid ka mid ah waxyaabaha aan isku dayeyno inaan ku celcelino ayaa ah diirad saarida maamulaha sida hoggaamiyaha waxbarashada, taasoo ka soo horjeeda maareeyaha dhimaha, iyo ku qalabeyntooda aalado u taageero macalimiintooda si fiican sida hoggaamiyayaasha waxbarashada.”

Maamulaha Doraville United Michelle Perez ayaa sheegtay in iskaashiga u dhexeeya Jaamacada Mercer iyo wafuuda ka socota Jamhuuriyada Dominican iyo DCSD uu yahay hormar heer sare ah.

“Gaар ахаан дугсига дегмада ёе аан ла вадааги карно оо аан фикрадо ка хели карно,” Maamule Perez ayaa sheegay. Waa xiisaheyga inaan taageero bulshooyinka u baahan iyada, oo waxay ii aheyd doco inaan helo fursadaan aan iyaga kula shaqeyo.”

“Wuxaan rajeyneynaa inaan barano wax walba oo aan awoodno si aan u taageerno bartayaasheena ELA,” Maamule Perez ayaa ku dartay. “Waan leenahay bartayaal ka soo jeedo Jamhuuriyada Dominican, marka waa inaan fahamnaa goobta ay ka imaanayaan si aan markaas u siino goobta ugu fiican halkaan oo aan kaga caawino in kala guurka si habsami leh u socdo.”

Dhaqtar Garvey iyo asxaabtiisa ayaa muujiyay rabitaankooda ah ay si un ugu laabtaan Gobolka DeKalb mustaqbalka.

“Wuxaan rajeyneynaa in dadka qaar ee ka soo jeedo Gobolka DeKalb ay si un ay noogu soo booqdaan Jamhuuriyada Dominican, soo booqdaan dugsiyadeena, oo ay sii wadaan isdhaafsigaan.”

XXX